



# HOGHOL

**Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter**  
| **Bil'ly - Monthly** |

## Walaa Tiroduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Doodhis (2-3)
- Heesty Abwaan Gathuuthoow (3-4)
- Magmaag (4-5)
- Dhaghanky (5)
- Manaahijta walbarashoothy Dowladda Federaalky (6)
- Munaasabadda 1da Luliyo (6)
- Wargiling (6)

**Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad**

## Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaalighy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

**Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)**

**Email:**

[afmaaydevelopmentcenter@gmail.com](mailto:afmaaydevelopmentcenter@gmail.com)

**Facebook:** <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

**Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.**



## Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebtii 2aad Baardheere Historia=Baardheere History

Sheek Ibreeing inty usu hangky banny Baardherre wey degganaayey buuly le eraaw "Aw usmaan " oo ky tirsing beledky Daafeet amy Wanly wiiyny. Sheek Ibreeing weyba haayey lang diinta islaamky eed ing barady oo Maky i Madiiny wal haky barady. Wey haayey lang heybad leh oo eed liingku qadariyaaw, degaanshey iyo arlaady ing dhow.

Sheek Ibreeing wey bilaawey ing usu deegaanshey ky fidiyi diinty islaamky, lakin dhiba kulu kulumi habky usu fadaayi ing diingty iing faafiyo. Dadky hogaanky qabiilky iya sidy usu fadaayi isly waayeeng.

Sheeqy wal ariiriyi, marky wey illahey ky ilhaamiyey in usu haajiro oo arly kala ing baho si usu ing faafiyo diinty. Sheek Ibreeing wey ly talideey as-haabtiis iyo ulumaady isky aragtidy haayeeng. Weyny ing shegeey in liky ilhaamiyi ing usu haajiro.

Fikridaas weybaa ha dhowaayey ing badang oo as-haabtiis ku mid eh. Weyba ly diyaariyey dad Sheeqy ly safara, wehelny ing naqada illaa degaanky kaly luku deeraaw.



Arrintaas Sheek Ibreeing eeda ingky farahy waany ha Dhowaayi.

Sheeqy iyo as-haabtiisa wey inis diyaaryeeny oo ing sahay qaa-dideeng safar dheer iyo ing adkeysidaan dhib i noog badang. Wey ky aqal qaadeeny Aw Usman iyagoo ing sii jeedang meely lyky ilhaamiyi oo nagada doonty Baardheere. Badaana wey dareer-ayeeny hammiinky, maadama maalinty kuleel ety. Weyba dareereeny muddo dheer, meely badangny mareeng. Meeloo bershoo wal ha dhowaayi, sahay iya ly siyi, laakiin hora ing dareereng.

Sheek Ibreeing i as-haabtiis midy deereeng Baardhere wey ly kulumeeny dhul eed ing geedy badang oo laamooshey is-qobsideeng. Weybaany bilaaweeny ing dhulky banaayang si ling hely meel iyo deggaang

Isly markiiby wey bilaaweeny dhisowky mowly ama misaajid meely hatty ky yaaly misaajidky wiing jaama Baardhere. Weyba liky dhiseey dhis ku koopng ood madow iyo jamby i laamo geedky baarky ii awtiis. Ku reed wey banaayeeny hilo iyo biyyi wabighy ku dhaansidaang, marky saasa ky degheeng oo rummy dhisitheng.

Markii ly warsidiy sababty usu ing dooridy weybigy, may ly sheegeey ing usu ery "hammiig walby inti safarky haky jernii wey hortey ky araghaayey iftiin, weyny ky hanuuneey ing meely iftiinky ky dhamaado deggny. Marky unu ha deerny meelung unu haddy degny iftiinkii is billeeriya wana dhammaadi. Saasa ky hanuuni ing inty degaanky naqady".

Hoolly usu bilaawi Sheek Ibreeing mudduthii yaraayti usu noolaayi weybaa ku mid aha misaajidky iyo hily-biyoodky. Sheeqy wey ashaabtiis kily dardarimeey ing nebbedly ly suggu maadaama dad diingty hang deerny deegaanky ing dhowaayeeng. Deegaansho oothaa ky wareejiyng si ingku neped galaang dughaagty.

Sheek Ibreeing weybaa noolayey 7 beri bes eh markii iyo Baardhere kooyeen. Ku reed tii Rabbii qobsity, wey lyky duugey misaajidky reedshey. Sheek Ibreeing oofsishidiis ku hor. wey ing derdarimeey ing Sheikh Aly Dhurre oo ku mid haayi aasaasiyaalky jameeathy naqathy Ulul-Amrighii lammaad iyo hogaangka jameeadda.

Ly dareer ....

**Diariying:** Omar Abdulqaadir Sh. Abdirahmang

## Qeepoo Dooghy/Delar av tal/Parts of speech

**Soomaali** (Maay tarri - Doo dhis; Maxaa tiri- Naxwe)

**Swedish** – Grammatik, English Gramma

## Meeleeye (mel)

Meeleeyey maybuwaaha ara' ama erey muujiyaaw hariirky ku dhohooyo maghyaa ama maghy ing yaalee iyo ereyi kale. Guud ahaang maaybaa in shal baheey meeleeye goob ama meel iyo meeleeye ammag ama goor. Hoo si kale ing dhikno meeleeye maaybuwaaha



4. Maxamed Gaab, «segretario» dello sheekh di Baardheere s Giuba nel 1893. A quell'epoca, egli era uno d (sawirky Mohamed Gaab oo aw Sh. Ebdiyow ly shaqee-yaayi 1893)

Ara’erey sheeghaaw meelly wal yaalaang, liki suubiyaaw; amangty wal li suubiyaaw ama li suubiyi doono; ama amangtii wal dhiyaayaang omboo ahaathaayaang

Meeleeye goob maay ku mid ahaa: kor, hoos, dhinny, mithig, bithy, hor, reed, dhatty, guthy, binnaangky IWM.

Tusaaly meeleeeye goob: Aaw waake looqee? Looqaa mingky gethaallisaa yaale.

Meeleeye ammag: hatty, barry, gee damby, billy ha dareerto, sinni dambe, qarnighii 10naad IWM.

Tusaaly meeleeeye ammag: Iid wiineey jimaatha ha dareertuwu

Meeleeyiyaalky goob ii goorby kulli isku midwu Maay tarri ii Maxaa tiri.

**Diyaring:** Abdullahi Sheikh Mohamed iyo AbdulqadirAbukar sheikh

### **Soomaali (Maay Hees, Maxaa Hees); Swedish sång, English Song Hees li maghy bahi Abwaang Gathuuthow Geethoo i Dapeelly Ay Gardorong**

Abwaan gathuuthow

Guudu guudu athii Guumow i goriyaathi ing heestey

geel hooraw i athiibaa lipyng ky geeraarteey

Abwaang gathuuthow

Goroongki furugly I inti goopanly

beledki gaally wantis Gothob lyngky maghy dari

meelli ling guuraayi i Gelgelli aboowshee

Abwaang gathuuthow

Gunudo su'aal ewaa hakii geme waany gothoob me'ee

ho galaaskaa ing deerny loor galeey me'ee  
withaayow ing kasbaaytoy

Gaarogha miinii taalle ing galooy  
ing gallooy beertiye

Intaas goghol dhigeey I Ga'al oo moqyng galang heethiskeyaa

Abwaang gathuuthow

Geethaghy i dapeelly Ay gar doryng??????

Geethaghy way jeelyaa ini ling gedgediine

hurnymy ing goony e i inii gothob ing noolathoo

Dapeelly guuhiyaasy      Gardoraathiye Geed meello kuroogho  
 tii geego dhaafti      tii geego dhaafti me e.  
 fiidisaa guraase      Gupylshey i aleentis Guudsheya tifaase  
 laamosheeyaa gooyase gupaasy Goobti ba enjejiyaasee  
 Golly goowad taasaa      ho goryti sheeg  
*Guthypeey dareeree*  
 Gu i deer shapeelly I      jubby i ganaanee  
 may ahadii hasly galena      Gee waleeba koofar may geedy iniing eying  
 Golwiingseey hegshoo I      may goobwiing ku weeydiyaayang  
 koo ha godoomayo      meelli geerad ky kooyi  
 waaqoow hegshee      ing guuraw Geekoo may lyng waayi  
 Golly kaleeny taasa      ho goryti sheeg  
*Guthypeey dareereey*  
 Geed meel dheer ky roogho  
 Guthaashey dugaal le Gerfy i dhahang gupulkaa king bedbaathiyaw  
 ii gaal mathiithyshey kaaghow      hoo goryti, goryti  
 Goryti iing sheeg

**Halabuurkii Afyaal Maamud H. Mahamd (tarash) i Abughaalkii Maalling Abdi Nur Umur**

### **Magmaag (Ordspråk):**

Apoor dudummi dhisi, god abeesii nagathee: Magmaagduung maaybaa dad tusaasee ing Ilaaheey uungsheey kibby meeloo omboo sithoo awood ing siyi oona e' wal lili yaabo. Magmaagda may kale sheeghaasee in uungki Ilaaheey walii haanoo suubiyaang haanoo kale istimaalaayaang omboo ki dhaghamaayaang. Qiibta hore haddi ha qaathino maay-babaa lili yaabeey ing dudumy apoor dhisi, ha dhisoo hungjhuftisaa ki dhisi hatina hami-ingleey dhisi. Ilaaheey amarsheewu ii awooddiis usu siyi ing ayayaangkuung yar yar dhiso duduma wiing oo nooliyaal kun jeer ku wiing galaayaang waana ki dhaghamaayaang. Maayba ku sii yaab lahaa ing usu ing suubiyi kor ilaa hoos meel gothotee dudumaatha haku galaang aftiing ii dabeel omobo leer. Qiibta lammaad hoo fiiriino, Apoorka maddii





**Wargiling:**

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

**Eamil. afmaaydevelopmententer@gmail.com**

**Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)**

**c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige**

**Föreningarnas Hus**

**Slottsgatan 13A, 70361 Örebro, Sverige**

**Tel. 019-133110**

**E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com**

**Haqeeey i sii**

**Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheelitiring.**

**1- Buugaagty Mahaa tirileey ky qoronyiing**

**2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy wana addaala dorruwu**

**AMDC**

**Munasipadda Dabbaaldegy 1da Luliyo 2020**

1/7/1960-1/7/2020. Lihithung sinny ku hor iyee gumeysteyaalkii Taliyaaniga iyo Ingriiska Soomaaliya ku tabeen. Soomaalina may arteey huraa enny.

Geeky Soomaali badang guthy ii binaang iyee ing dabbaal deghooaayaang huriyadaas.

Nasiib dorry maybaa jeree dad bathang oo gopoleethiyoo liky haaysithoo jithitee liing surunyi isbaaro hantithy liingku dhiyooaayo iyo haano ha barakaheenoo herooying ki jeraang. Dabbaal dego koraanaa?

Hoo isky deyaang, dabbaaldegshoo see naghathee? Jawaabty umuty Soomaaliyeed iyee ing taalle.